ICRC

SOMALIA

# XAQIIQOOYINKA & TIROOYINKA

**JANAAYO - JUUN 2023**

## ILAALINTA DADKA RAYIDKA AH

- **68** qof ayaa ICRC la wadaagay walaaca ay ka qabaan arrimaha ammaanka iyo badqabka ee la xiriira colaadaha.
- **20** qof ayaa helay kaalmo lacageed si looga caawiyo ka soo kabashada dhibaatooyinka ka dhasha colaadaha iyo rabshadaha halka **12** kalena loo diray hey'ado kale oo aan saaxiib nahay si ay u helaan adeegyada ay u baahanyihiin.
- Walaac ay soo gudbiyeen **10** qof ayaa lala soo qaaday kuwa hubka sita si loo raadiyo magdhow loogana hortagayo waxa mustaqbalka dhici kara.
- **270** qof, oo ay ku jiraan shaqaale ka socda laba isbitaal iyo sadex xarun caafimaad ayaa helay xog ku saabsan Daryeelka Caafimaadka oo Halis ku jira si loo dhiirigaliyo ixtiraamka shaqaalaha caafimaadka, xarumaha, iyo gaadiidka.

## ILAALINTA XIRIIRKA QOYSKA

- Iyada oo la kaashanayo SRCS, **47,594** oo ah farriimaha Bisha Cas ayaa la isdhaafsaday, **75,843** oo ah wicitaano taleefan oo bilaash ah ayaa loo sameeyay qoysaska kala lumay iyo **166** oo ah dad la la'aa oo la soo helay.
- **3** oo wicitaano muuqaal ah ayaa loo fududeeyay qoysas ku nool Soomaaliya iyo **2** maxbuus oo ku jira Guantánamo.
- **32** oo adeeg wicitaano taleefan ah ayaa loo fidiyay qoysaska maxaabiis ku xiran Soomaaliya iyo maxaabiis xaaladooda lagula socdo Jigji Itoobiya.

## KOR U QAADISTA SHARCIGA CAALAMIGA AH EE BINI'AADAMNIMADA (IHL)

- **452** oo ah xubno ka tirsan ciidamada qalabka sida, nabad sugidda iyo booliska ayaa la baray sharciga caalamiga ah ee bini'aadamnimada iyo mabad'ida.





## HAGAAJINTA XAALADAHA NOLOLEED IYO LA MACAAMILKA MAXAABIISTA

- ICRC-da ayaa **14** booqasho ku tagtay **8** xabsi si ay u qiimeyso una hagaajiso xaaladaha nololeed iyo habka loola macaamilo **3,255** maxaabiis ah. **240** maxaabiis ayaa la kormeeray lana booqday si gaar gaar ah.
- Isugeyn, **4,182** maxaabiis ah oo ku jira **14** xabsi ayaa helay agabka nadaafadda sida saabuunta, jergaano iyo baaldiyaal.
- **17** farriimaha akhbaarta qoyska ah ayaa loo diray qoysaska maxaabiista iyada oo la adeegsanayo taleefan iyo **2** Qof oo ajnabi ah oo lagu wargaliyay wakiillada qunsulkooda ama UNHCR. **8** Farriimaha Laamqeyrta Cas ah aye isdhaafsadeen maxaabiista iyo qoysaskooda.
- Isugeyn, **196** oo ah maxaabiis ku jira xabsiyada dhexe ee Garoowe iy Mandheera ayaa laga daweeyay nafaqo xumo. Kuwaa oo **38** ka mid ah ay qabeen nafaqo xumo aad u ba'an.
- **3,910** maxaabiis ah oo ku jira **12** xabsi ayaa helay saliid, misir, caano, timir, sokor, yaanyo shiishiid, iyo hilib ari oo cunto ahaan loogu talogalay si loogu dabbaal dego Bisha Barakaysan ee Ramadaan.
- **569** maxbuus ayaa ka faa'iideystay dhismaha meel hawada u furan iyo nidaam biyo qeybin ah oo laga hirgaliyay Xabsiga Mandheera.
- **122** ah qeybgaleyaal ka kala socday Ciidanka Asluubta ee Somaliland iyo Puntland ayaa qaatay tababarro ku saabsan Xeerka si ay uga caawiyaan si ay uga caawiyaan in ay si wanaagsan u gutaan howl-maalmeedkooda maareynta xabsiga.
- **29** maxaabiis ah ayaa lagu daweeyay xarumo caafimaad oo gaar ah, kuwaa oo laba ka mid ah ay ICRC-du dhaqaale ahaan u taageertay.
- Deeqo isugu jira dawooyin iyo agab kale ayaa la gaarsiiyay **5** xabsi.
- **289** maxaabiis ah oo qaba ayaa la taageeray **2** xabsi.
- **173** maxbuus ayaa la gaarsiiyay agabka aasaasiga ah sida saliyaal, joodariyaal, marooyin-kaneeco iyo bustayaal.

## HURUMARINTA HELITAANKA DARYEELKA CAAFIMAADKA

- **220,369** bukaan ayaa helay Daryeelka caafimaadka aasaasiga ah iyaga oo ka helay **30** xarun caafimaad oo ka tirsan SRCS.
- **10,106** bukaan ayaa la daryeelay iyada oo la adeegsanayo Barnaamijka Daweynta Bukaan socodka. **30** xarun caafimaad oo ka tirsan SRCS ayaa lagu taageeraa barnaamijka kaas oo ka caawinaya in bulshada loo soo dhaweeyo adeegyada nafaqeynta.
- **3,018** baaritaano ah ayaa laga sameeyay Isbitaalka Guud ee Kismaayo, **1,061** oo laga sameeyay Isbitaalka Keysaney, **3,595** oo laga sameeyay Isbitaalka Madiina iyo **5,095** oo laga sameeyay Isbitaal Goboleedka Bay. Dhammaan afarta isbitaal waxaa taageera ICRC.
- **2,129** caruur ah oo ka yar 5ta sano oo qabay nafaqo xumo aad u daran ayaa isbitaal la seexiyay iyada oo lagu daweeyay Xarumaha Dajinta xaaladda bukaannada ee Kismaayo iyo Baydhabo.
- **1,119** bukaan oo laga keenay Xarumaha Daryeelka Caafimaadka Aasaasiga ah ayaa loo gudbiyay isbitaallo kala duwan si ay u helaan daryeel deg-deg ah ama gaar ah iyada oo lacagta gaadiidkana laga bixiyay.



## KA JAWAABIDDA SHUBAN BIYOODKA DARAN

- **93,935** qof ayaa ka qeybgalay kulamo caafimaadka kor loogu qaadayo loogana hortagayo shuban biyoodka daran.
- **1,764** xaalado shuban biyoodka daran ah ayaa la aqoonsaday iyada oo loo gudbiyay xarumo SRCS ka tirsan oo kala duwan oo kuyaala meelaha uu shuban biyoodku ka jiro si loogu daweeyo.
- **177,000** qof ayaa helay agabka nadaafadda sida saabuunta, kaniiniga biyaha lagu nadiifiyo iyo jirgaano iyo sidoo kale macluumaad ku saabsan ka hortagga iyada oo laga jawaabayo xanuunada dillaacay ee biyaha ka dhasha iyo daacuunka ee magaalooyinka Baladweyne, Badhaba iyo Kismaayo.

## DHAQAN CELINTA JIRKA

- **3,873** qof ayaa helay adeegyada dhaqan celinta jirka- **1,935** oo Muqdisho ah, **1,230** Gaalkacyo iyo 708 Hargeysa.
- Marka la isku daro, dhammaan xarumaha dhaqan celinta jirku waxa ay fuliyeen **12,532** kulamo fiiso-tarbiyo ah. Intaa waxaa dheer, **277** qeybaha jirka oo macmal ah, **958** qalabka xubnaha jirka kaalmeeya ah, **773** qalabka socodka kaalmeeya iyo biraha naafada, **115** kuraasta naafada iyo aaladaha lagu toosiyo qaab-dhismeedka jirka ayaa la bixiyay isugeyn.

## GARGAARKA DEG-DEGGA AH IYO DARYEELKA ISBITAALKA KA HOR

- **1,557** oo qaba dhaawac hub ah ayaa la daweeyay lana daabulay iyada oo la adeegsanayo Adeegyada Gargaarka deg-degga ah iyo Daryeelka deg-degga ah ee Isbitaalka ka hor.
- **225** qof ayaa qaatay Koorsooyinka Tababarka Gargaarka Deg-degga ah ee Bulshada (CFAT) tabarkan oo ka qabsoomay magaalooyinka Ceerigaabo, Hargeysa, Muqdisho, Beletweyne, iyo Bosaaso.
- A further **2,068** oo ka qeybgaleyaal dheeri ah ayaa xaadiray koorsooyin Gargaarka Deg-degga ah oo ay bixisay Bisha Cas (SRCS) arintan oo ka mid ah barnaamijkooda tababarka ee joogtada ah.
- **152** qof, oo ay ku jiraan ka jawaabayaasha aambalaasyada, kuwa hubka sita iyo madaxda barnaamijka ayaa qaatay tababar ku saabsan gargaarka deg-degga ah iyo daryeelka isbitaalka ka hor.

## GARGAARKA DEG-DEGGA AH IYO SOO CELINTA HAB NOLOLEEDKA

- **56,406** qof ayaa helay markii sadexaad taageero lagaceed arintan oo qeyb ka ah ka jawaab celinteena abaarta. Intaa waxaa dheer, **40,506** qof ayaa oo colaadaha iyo fatahaaduhu saameeyeen ayaa lagu caawiyay ugu yaraan hal wareeg oo taageero lacageed ah.
- **21,373** oo ah caruurta 5ta sano ka yar iyo **7,577** oo dumar uur leh ayaa la siiyay (plumpysup), oo ah cunto nafaqo dheeri ah, iyo boorash si looga hortago nafaqo xumida.
- **1,735** beeraley ah oo ku dhaqan jiinka wabiga ayaa la gaarsiiyay deeqo lacageed si loogu caawiyo si loogu caawiyo in ay dib u soo nooleeyaan hab nololeedkooda.
- **146** shaqsi iyo qoysaskooda ayaa helay lacago ay ku shaqeystaan iyo agabka lagu dayactiro kaabayaasha.
- **271** xubnood oo ka tirsan iskaashatooyinka beeraleyda ayaa helay walxo ku saabsan beeraha, oo ay ku jiraan abuurka, bacrimiye, sunta cayayaanka, carro gedis, iyo tababarro ku aadan wax soo saarka abuurka mar walba la beerto.
- **881** oo ah dumar hogaamiya qoysas ayaa lagu caawiyay deeqo loogu talogalay ganacsiyada yar yar.







## FUDUDEYNTA HELITAANKA BIYO NADIIF AH, NADAAFADDA IYO ADEEGYADA KAABAYAASHA CAAFIMAADKA/XABSIYADA

- **371,618** qof ayaa biyo nadiif ah ka helay **63** nidaamyada biyaha ah.
- Shidaal ayaa la siiyay **30** ceel oo ku yaala meelaha ay abaartu ku dhufatay iyada sidaas darteedna la hubiyay in **47,617** qof ay helaan biyo la cabi karo
- **53,446** qof ayaa helay biyo nadiif ah iyaga oo ka helay nidaamka biyo dhaaminta iyo hagaajin lagu sameeyay meelaha biyaha laga helo sida matoorrada inta ay colaadda Laas Caanood socotay.
- Shaqooyin dayactir ah ayaa laga fuliyay isbitaallada ay ICRC taageerto- qeybta qaliinka ee isbitaalka Guud ee Kismaayo, qolka dhaqidda iyo keydinta ee isbitaalka Keysaney iyo musqulaha ee xarunta dajinta xaaladda bukaanka ee isbitaal Goboleedka Bay.
- **3** xarumood ee Daryeelka Caafimaadka Aasaasiga oo ku yaala Beled Xaawo, Raage Ceelle iyo Baardheere aya gabi ahaanba dib loo dhisay.
- **10** shaqaalaha ceelasha Wakaaladda Biyaha Puntland (PWDA) ayaa tababar loo sameeyay iyada oo sidoo kalena la siiyay qalab ay howl-maalmeedkooda dayactirka ceelasha ku qabsadaan.



## U-XISSAB CELINTA DADKA AY DHIBAATADU GAARTAY

- Isugeyn **14,424** wicitaano oo ka yimid dad ku nool meelo kala duwan oo dalka ah ayaa la helay lagana shaqeeyay iyada oo loo marayo nambarka bilaashka ah ee xiriirka bulshada- 373.
- **90%** ka mid ah wicitaannada ayaa la xiriiray tageerada gargaarka deg-degga ah halka **8%** ka mid ahna ay la xiriireen barnaamijkeena caafimaadka. Inta ugu badan codsiyada ayaa ahaa kaalmo cusub ama dheeri ah halka in yar oo ka mid ah dadka wax wacayay ay dabasocdeen kaalmo aan wali la helin ama aanan la xaqiijinin. In yar oo ka mid ah wicitaannada ayaa iyana ka mahadcelinayay kaalmo ay heleen.
- **66** wicitaano ah ayaa laga helay bulshada ay dhibaatadu Laas Caanood ku gaartay iyaga muujiyay walaaca ay ka qabaan arrimo la xiriira Dhowridda. Kaalmada ugu badan oo ay dadku raadinayeen ayaa aheyd taggerada lacageed iyo midda la xiriirta hab nololeedka, halka uu sidoo kalena jiray hal codsi oo la xiriiray in qof qoyskiisii ay kala lumeen dib loola mideeyo.
- **98%** ka mid ah dadka kaalmada lacageed iyo taageerada hab nololeedka loo diiwaangaliyay ayaa waxaa xaqiijiyay xarunta wicitaanka ICRC.



ICRC Somalia Delegation
Ngecha Road
off Lower Kabete Road
P.O.Box 73226-00200
Nairobi-Kenya
T + 254 0709 132 000
SOK-Nairobi@icrc.org

ICRC

Xafiisyadha ICRCda ee Mogadishu, Kismayo, Garowe, Baidoa, Jowhar, Guricel and Hargeisa.
www.icrc.org
All photos: ICRC
© ICRC, August 2023

facebook.com/ICRCAfrica
twitter.com/ICRC_Africa
https://www.instagram.com/icrc_somalia/
blogs.icrc.org/Somalia

Reference Number